# Istaraatiijiyadda TISK oo wax laga beddelay

Wax-ka-beddelaad ayay dawladdu ku samaynaysaa istaraatiijiyadda tijaaba-qaadka, gooni-u-bixidda, raadraaca cudurka iyo karantiilka (TISK). Karantiilka qofka u dhowaada qof cudurka laga helay waxaa lagu beddelayaa tijaabada qofku iska qaadayo oo isticmaalkeeda la badinayo, halkaas oo qofka gaarka ahi wargelinayo dadkii u dhowaaday marka ay tijaabadu qofka cudurka ku sheegto.

Dhaqaalihii degmooyinka kaga bixi jiray TISK-ga waxaa hadda kaddib loo isticmaali doonaa meelaha ay waxyeellada ugu weyn ka soo gaarto is-qaadsiinta cudurrada. Taas oo degmooyinka u suuragelinaysa in ay awoodda saaraan maaraynta marka uu cudurku ka dillaaco adeegga caafimaadka iyo daryeelka, iyo raadraaca cudurka ee dadka u nugul haddii cudurku ku dhaco iyo kuwa aan difaacnayn sida isticmaalayaasha adeegga daryeelka iyo dadka halista weyn ugu jira in ay ku xanuunsadaan haddii cudurku ku dhaco.

- Istaraatiijiyadda TISK-ka ee hadda jirta waa mid hadda iyo mar horeba uu wakhti iyo kharash badan kaga bixi jiray degmooyinka. Waxaan doonaynaa istaraatiijiyad waari karta, wax laga beddeli karo oo la waafajin karo is-beddellada cudurka safmarka ah iyo heerka tallaalka ee dadweynaha. Sidaa awgeed waxaan u gudbaynaa in uu qofka gaarka ahi in intii hore ka badan la wareego hawlaha tijaaba-qaadka iyo kuwa raadraaca cudurka. Si ay haddaba hawlahaas u fuliyaan dadka cudurku ku dhaco, waa in warbixin fiican oo fudud laga siiyo waxa raadraaca cudurku yahay iyo waxa looga baahan yahay in ay qabtaan. Hay’adaha ayaa durba la faray in ay kuwaas diyaariyaan, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

**Wax-ka-beddel lagu sameeyay xeerarka karantiilka dadka cudurka laga helay**

Caqabad ayay bulshada ku noqonaysaa haddii ay dad badan karantiil galaan. Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) waxay sidaas darteed soo jeedinayaan in la joojin karo karantiilka dadka u dhowaaday qof cudurka laga helay ee aan guriga la degganayn ama si kale ugu dhoweyn qofkaas cudurka laga helay. Soo-jeedintaas ayay dawladdu qaadatay.

Karantiilka dadka u dhawaaday qof cudurka laga helay ee aan guriga la degganayn ama si kale ugu dhoweyn qofkaas cudurka laga helay, waxaa la joojinayaa laga billaabo khamiis 13-ka jannaayo marka ay saacaddu tahay 24. Soo-jeedintaas ayay dawladdu qaadatay. Waxaa dadkaas lagula talinayaa in ay tijaabo iska qaadaan 3 iyo 5 maalin kaddib markii ay u dhawaadeen qofka cudurka laga helay. Waxaa lagula talinayaa in ay 10 maalin si wanaagsan ula socdaan calaamadaha cudurka. Haddii uu qofku calaamadaha cudurka isku arko waa in uu guriga joogaa oo tijaabo iska qaadaa.

- Sida uu sheegay Machadka Caafimaadka Dadweynaha tijaaba-qaadku waa hab waxtar leh oo cudurka lagu ogaado, bulshadana in badan uga raqiisan karantiilka - qofkana uga dhib yar. Tijaaba-qaadku wuxuu hoos u dhigaa ka-maqnaashaha shaqada, wuxuuna yareeyaa culayska tillaabooyinka. Waxaan sidaas darteed Agaasinka Caafimaadka faray in uu galo heshiis hordhac ah oo lagu soo iibanayo ilaa iyo 100 milyan oo kale oo tijaabooyin ah. Dadweynuhu bilaash ayay ku helayaan tijaabooyinka, ayay tiri Kjerkol.

*Dadka u dhowaaday qof cudurka laga helay ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow qofkaas cudurka laga helay*
Waxaa dawladda lagula taliyay in shuruudda hadda jirta ee ah in ay 10 maalin oo karantiil ah galaan dadka guriga la deggan ama si kale ugu dhow qof cudurka laga helay in lagu beddeli karo in ay dadkaasi maalin walba tijaabo iska qaadaan ayaga oo tijaaba-qaadka wadaya ilaa shan maalin ka soo wareegayso markii u danbaysay ee ay u dhawaadeen qofka cudurka laga helay. Dadka aan ka soo bixi karin rajiimka tijaabada waa in ay karantiil galaan toban maalin. Dawladdu way soo dhawaynaysaa wax-ka-beddelkaan, laakiin ka hor intaan is-beddelkaas

dhaqangelin waa in aan hubinnaa in ay degmooyinku heli karaan tijaabooyin ku filan. Waxaa kale oo loo baahan yahay in ay degmooyinku abuuraan nidaam tijaabooyinka guryaha loogu qaybiyo.
Xeerarka karantiilka ee hadda jira waxa ay weli qabanayaan dadka u dhawaaday qof cudurka laga helay ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow qofkaas cudurka laga helay.

### Abka Smittestopp ee joojinta is-qaadsiinta cudurka

Wax-ka-beddelaadda cusub ee lagu sameeyay TISK-ka ayaa abka Smittestopp ee joojinta is-qaadsiinta cudurka ka dhigaysa mid aad loogu baahan yahay.

- Hadda ayaan si dhab ah ugu baahannahay. Markaa haddii aadan horay ula soo degin, hadda la soo deg. Haddii uu cudurku kugu dhacana, xusuuso in aad abka geliso. Waa qarsoodi. Dadkii aad u dhowaatay degdeg ayaa loo ogeysiin doonaa. Ma ogaan karaan qofka cudurka laga helay, laakiin waxaa loo sheegayaa in ay ka digtoonaadaan calaamadaha cudurka oo ay tijaabo iska qaadaan, ayay tiri Kjerkol.
Haddii ay dad badan billaabaan in ay isticmaalaan abka Smittestopp, waxaa fududaanaya hawlaha raadraaca cudurka oo waxay gacan ka geysanaysaa joojinta is-qaadsiinta cudurka. Waxaa kale oo abka Smittestopp loo isticmaali karaa safarrada Midowga Yurub (EU) iyo kuwa Waddammada Aaagga Dhaqaalaha Yurub (EØS). Wuxuu ku qoran yahay afaf badan sida af-carabiga, af-turkiga iyo af-urduuga.